Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah

# الجريدة الرسمية

# Official Bulletin

# EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 OCTOBER 2023** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## APRIL - OCTOBER

# 2023

**XEER MADAXWEYNE LR. 142** **TAARIIKH: 8 OKTOOBAR 2023**

**DHISMAHA LAANTA LA-SOCODKA HUBKA IYO RASAASTA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah,kuna saabsan xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo awoodihiisa dastuuriga ah;

**MARKA UU ARKAY:** Baahida loo qabo in la horumariyo hannaanka maareynta hubka iyo rasaasta iyada oo la xaqiijinayo Amniga Qaranka, daahfurnaanta, iyo u-hoggaansanaanta halbeegyada caalamiga ee la xiriira maareynta hubka iyo rasaasta;

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**CUTUBKA 1AAD**
**DHISMAHA IYO UJEEDDADA**
**QODOBKA 1AAD**
**DHISMAHA**

1. Waxaa la dhisay marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta taas oo noqonaysa mid u madaxbannaan xilgudasheeda kana tirsan Xafiiska Amniga Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**QODOBKA 2AAD**
**UJEEDDADA**

1. Ujeeddada kowaad ee laga leeyahay Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta waain ay la socoto oo korjoogteyso maareynta, dhaqdhaqaaqa iyo adeegsiga hubka iyo rasaasta gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Laantu waxa ay ka shaqeynaysaa sidii loo horumarin lahaa kartida iyo aqoonta laxiriirta maareynta hubka iyo rasaasta ee hay'adaha amniga Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo gobollada kale ee dalka.

3. Laantu waxa ay u ololeynaysaa daahfurnaanta, isla xisaabtanka, iyo isticmaalka saxda ah ee waxyaabaha qarxa iyo rasaasta ee Ciidamada Amniga Soomaaliyeed.

## CUTUBKA 2AAD
## QAAB-DHISMEEDKA
### QODOBKA 3AAD
### QEYBAHA LAANTA

1. Laantu waxa ay hoostagaysaa Xafiiska Amniga Qaranka waxayna ka kooban tahay qeybaha soo socda:

   a) Qeybta la-socodka;
   b) Kooxda Kaalmada Farsamo;
   c) Guddiga La-talinta

### QODOBKA 4AAD QEYBTA LA-SOCODKA

1. Qeybta la-socodka waxay u xilsaaran tahay hawl maalmeedka, turxaanbixintaxogaha, warbixinnada, iyo isku dubbaridka hawlaha laanta.

### QODOBKA 5AAD
### KOOXDA KAALMADA FARSAMO

1. Kooxda Kaalmada Farsamo waxay ka kooban tahay khubaro aqoon u leh maareynta hubka iyo rasaasta, maareynta haraadiga walxaha qarxa, maareynta elektarooniga ah ee xogaha (IT), iyo arrimaha sharciga.

### QODOBKA 6AAD
### GUDDIGA LA-TALINTA

1. Guddiga La-talinta wuxuu ka kooban yahay xubno ka socda hay'adaha Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka,

gobollada kale ee dalka, iyo saaxiibada caalamiga ah ee Soomaaliya ka taageera arrimaha maareynta hubka iyo rasaasta.

## CUTUBKA 3AAD
## HAWLAHA IYO WAAJIBAADKA
## QODOBKA 7AAD
## LA-SOCODKA IYO KORJOOGTEYNTA

1. Laantu waxa ay la soconaysaa keydinta, maareynta, iyo qaadista ama daabulista hubka iyo rasaasta ee gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Laantu waxa ay sameynaysaa baaris joogto ah iyada oo booqashooyin baariseed ku tagaysa goobaha hubka iyo rasaasta lagu keydiyo ama ay yaallaan si waafaqsan halbeegyada u degsan maareynta hubka iyo rasaasta.
3. Laantu waxa ay baaraysaa arrimaha hubka iyo rasaasta iyada oo ka wabixinaysa wixii khaldan xagga maareynta ama tirada hubka iyo rasaasta iyo dhacdooyinka la xiriira maareynta hubka iyo rasaasta.

## QODOBKA 8AAD
## TABOBARRADA IYO KAALMADA

1. Laantu waxa ay bixinaysaa kaalmo farsamo, tabobar, iyo wax allaale wixii kor loogu qaadi karo aqoonta iyo kartida Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ee la xiriirta maareynta hubka iyo rasaasta.
2. Laantu waxa ay qabanqaabinaysaa kulamo aqoon-kordhin iyo barnaamijyo tabobar oo la siinayo xubnaha Ciidamada Amniga.
3. Laantu waxa ay fududeynaysaa aqoon-is-weydaarsiga iyo wax-kala-barashada u dhaxeysa hay'adaha Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

## QODOBKA 9AAD
## DABAGALKA ELEKTAROONIGA AH IYO WARBIXINNADA

1. Laantu waxa ay gacanta ku heynaysaa xog-dhigaal elektaroonig ah oo ay ku keydsan yihiin dhammaan xogaha hubka iyo rasaasta diiwaangashan.
2. Laantu waxa ay soo saaraysaa warbixinno joogto ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa iyo xaaladda hubka iyo rasaasta.

3. Laantu waxa ay xaqiijinaysaa in xogaha xasaasiga ah loo keydiyo loona maareeyosi aan wax u dhimeynin Amniga Qaranka.

## QODOBKA 10AAD
## HANNAANKA XIRIIRKA

1. Laantu waxa ay dhisaysaa ayna gacanta ku heynaysaa hannaan xiriir oo ay kula shaqeyso Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Ciidamada Amniga.

2. Laantu waxa ay si degdeg ah uga soo jawaabaysaa weydiimaha, cabashooyinka, iyo talooyinka ka soo gaara hay'adaha heer dawlad goboleed.

3. Laantu waxa ay ku shaqeynaysaa hannaan taabbagelinaya xiriir furan iyo wadashaqeyn.

## CUTUBKA 4AAD

## WARBIXINNADA IYO ISLA XISAABTANKA
## QODOBKA 11AAD
## WARBIXINNADA IYO ISLA XISAABTANKA

1. Laantu waxa ay warbixinno joogto ah siinaysaa Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, saaxiibada caalamiga ee ay khuseyso, iyo cid kasta oo ka mid ah saamileyda hannaanka maareynta hubkaiyo rasaasta.

2. Laantu, marka ay gudanayso waajibaadkeeda, waxa ay ku shaqeynaysaa daahfurnaan iyo isla xisaabtan.

## CUTUBKA 5AAD

## MUDDADA IYO WAX-KA-BEDDELKA
## QODOBKA 12AAD
## MUDDADA

1. Xeerkaan Madaxweyne waxay dhaqangaleysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha waxayna ahaaneysaa dhaqangal haddii Dawladda Federaalka Soomaaliya aysan beddelin ama burrin.

## QODOBKA 13AAD
## DIB-U-EEGISTA IYO WAX-KA-BEDDELKA

1. Xeerkaan Madaxweyne waxaa lagu sameyn doonaa dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel hadba sida baahidu ay tahay iyada oo la xeerinayo duruufaha cusub, faritaannada sharci, iyo baahiyaha shaqo.
2. Wax-ka-beddel kasta oo lagu sameynayo Xeerkaan Madaxweyne waxaa lagala tashanayaa Xafiiska Amniga Qaranka.

## CUTUBKA 6AAD

## QODOBBO GEBOGEBO AH
## QODOBKA 14AAD
## DHAQANGELINTA

1. Dhammaan hay'adaha dawladeed waxay kala shaqeynayaan kuna gacansiinayaanLaanta dhaqangelinta xeerkaan.

## QODOBKA 15AAD
## DHAQANGALKA

1. Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/103/2023
TAARIIKH : 29/11/2023
SAXIIX :
AV: Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**